

SAFETY FOR ALL SEASONS


KOHL'S
Cares.



Sido Loo Xidho Koofiyadda Ammaanka

Doorashashda iyo xidhistaa koofiyadda ammaanka aad bay muhiim u tahay! Marka aad dooranaysid koofiyadda ammaanka, u hubso inay tahay mid laga xaqiijiyay CPSC (CPSC Certified), oo ay tahay koofiyad sax ku ah isboortigaaga.

U hubso inay koofiyadda ammaanku tahay cabbir sax ah, oo ay si fiican u hayso wareegga dhafoorkaaga ama madaxaaga hore. Waa in dareenka aad ka dareemaysid la mid yahay koofiyaddaada oo hab siinaysa madaxaaga!



Sida loo xidho koofiyadda ammaanka:


Talaabada 1. Isku tijaabi koofiyadda ammaanka. U hubso inay si fiican u le'eg tahay madaxaaga iyada oo aan dhinac u ruxmin.

Talaabada 2. Waa in koofiyaddu si isku siman u saaran tahay madaxaaga. Waa in madaxaaga hore uu daboolan yahay illaa meel wax yar ka sareysa suniyaha.

Talaabada 3. Qabatada bidixda ku aadi badhtamaha hoosta gadhkaaga. Dheeree ama gaabi suumanka si aan wax ka badan hal far u gali karin hoosta suunka. Waad iska saari kartaa koofiyadda si aad u hagaajisatid.

Talaabada 4. Hagaajiso dhaqdhqaqaqaha ku yaala labada suun si qaab ah "Y" ugu sameyso agagaarka dhegaha.

Talaabada 5. Koofiyadda ku adkee hoosta gadhkaaga, ka taxadir qaniinka!



Talaabada 6. Iyada oo koofiyaddu kuu adkeysan tahay, fur afkaaga, sida hamaansi weyn. Koofiyaddu waxay hoos u soo riixi madaxaaga, laakiin aad uma giigsanaan doonto. Waa inaad awoodid inaad hadashid oo qososhid iyada wali aad raaxo ku qabtid koofiyadda.

Talaabada 7. Waa inaan koofiyaddu dhaqaaqin haddii aad ka jiidid ama ka riixdid dhinac illaa dhinac ama hore illaa gadaal u riixdid.

Talaabada 8. Hadda samee hubintii ugu dambeysay. Haddii koofiyaddaadu dib uga dhaqaaqdo dusha suniyahaaga wax ka badan 2 faradood, waa inaad dib u hagaajisid si le'ekaan fiican loo helo. Hubi in koofiyaddu u soo dhaqaaqayso xagga indhahaaga. Haddii ay soo dhaqaaqayso, dib u hagaaji si le'ekaan fiican loo helo!

Talaabada 9. Hadda diyaar baad u tahay inaad tagtid! Xusuuso, is maaweeli, laakiin halis dheeraad ah ha is galin sababta oo ah kaliya waxa aad xidhan tahay koofiyadda ammaanka!